



WAAXDA BADBAADADA DADWEYNAHA EE MINNESOTA  
ADEEGYADA DIRAWALKA IYO BAABUURTA

**Foomka Shahaadada Turjumaada**

**Xeerarka Minnesota, Cutubka 7410.0400, Qaybhoosaadka. 5, wuxuu u baahanyahay in dhammaan dukumeentiyada loo gudbiyo Waaxda Badbaadada Dadweynaha ee Minnesota (DPS) ee ku qoran luqad aan Ingiriisi ahayn inay la socdaan tarjumaada dukumeentigaas oo Ingiriisi ah.**

- Dukumeentigaaga ha turjumo qof ama wakaalad la ansixiyay oo ka mid ah kuwa hoos ku qoran, ama mid aan xirfadle ahayn oo u qalma oo karti u leh. Ha kuu buuxiyaan foomkan caddaynta oo ha la socdo tarjumaada. Foomkan waa in la buuxiyo oo lagu soo celiyo Ingiriisi.
- Dhammaan noocyada la turjumay ee foomkan ee luqad kasta ah waxaa loogu talagalay tixraac ahaan oo kaliya.
- Haddii aad qabto su'aalo ama aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah, fadlan kala xiriir DVS (651) 297-3298.

Sharaxaada dukumeentiga la turjumay (dukumentiga asalka ah iyo dukumeentiga la turjumay waa inay soo raacaan foomkan)

Qofka uu ku saabsanyahay dukumiintigu (MAGACA DAMBE, MAGACA KOOWAAD, MAGACA DHEXE) Taariikhda Dhalashada qofka uu ku saabsanyahay dukumiintigu (mm/dd/yyyy)

Turjumaanku waa inuu xaqiijiyo dhammaan waxyaabaha soo socda:

- Dukumeentiga kor lagu magacaabay waxa la socda tarjumaad Ingiriisi ah oo dhammaystiran.
- Turjumaada dukumeentiga kor lagu magacaabay waa run oo sax ah. (Sax ah macnaheedu waa in dhammaan erayada dukumeentiga la soo bandhigay loo turjumay si sax ah.)
- Turjubaanka waxba isuma aha dhalasho ama guurka ahaan qofka uu ku saabsanyahay dukumeentigu.
- Waxaan caddaynayaa inaan ahay mid ka mid ah kuwan soo socda (doro mid):
  - aqoonsi in ay siisay Ururka Turjubaanada Maraykanku;
  - uu i aqoonsanyahay Shaybaarka Turjumaada ee Minnesota;
  - ay i shahaadaysay maxkamad awood u leh;
  - ay i ansixiyeen safaarad ama qunsuliyada Maraykanka, ama diblomaasi ama sarkaal qunsuliyadeed oo waddan shisheeye ah oo loo xilsaaray ama laga aqoonsan yahay Maraykanka;
  - aan xiriir la leeyahay ama ay i ansixisay Adeega Waaxda Dhalashada iyo Socdaalka ee Maraykanka ama awood dawladeed gudaha Maraykanka;
  - ahay libiye ku jira liiska si uu u bixiyo adeega turjumaada ee gobolka Minnesota (liiska waxaa laga heli karaa drive.mn.gov);
  - ahay qareen u shatiyaysan inuu ku shaqeeyo gudaha Maraykanka, ama ku qof ku xiriirsan qareenkaas; ama
  - qof u qalma oo aan xirfadle ahayn, karti u leh inuu ka soo turjumo \_\_\_\_\_ una turjumo Ingiriisi.
- Waxaan fahamsanahay in haddii qayb ka mid ah turjumaada ay si ula kac ah u been abuurto u tahay, in aan ku mutaysan doono ciqaab.

Magaca Buuxa ee Turjubaanka (Fadlan qor Magaca Koowaad, Dhexe, iyo Magaca Dambe)

**X**  
Saxiixa Turjubaanka

Taleefanka Turjubaanka

Cinwaanka Turjubaanka

Emailka Turjubaanka

## **Ogeysiiska Tennesen:**

### **Maxay tahay ujeedada laga leeyahay bixinta macluumaad dheeraad ah?**

Adeegyada Darawalka iyo Baabuurta (DVS) waxay ururiyaan macluumaadka la codsaday ujeeddooyin aqoonsi si loo bixiyo kaararka aqoonsiga, ogolaanshaha barista, iyo shatiga darawalnimada marka dukumeentiga lagu soo bandhigo luqad aan Ingiriisi ahayn, sida uu qabo Xeerarka Minnesota, cutubka 7410.0400, Qaybhoosaadka. 5.

### **Miyaan ku qasbanahay inaan bixiyo macluumaadkan?**

Maya. Lagaagama baahna inaad bixiso macluumaadkan.

### **Maxaa dhici doono haddii aanan bixinin macluumaadkan?**

Waad diidi kartaa; laakin, DVS ma aqbali karto dukumeentiyo ku qoran luqad aan Ingiriisi ahayn iyada oo aan la helin tarjumaad la aqbali karo sida uu qabo Xeerarka Minnesota, Cutubka 7410.0400, Qaybhoodaada. 5.

### **Yaa heli doona macluumaadka la codsaday?**

DVS waxa laga yaabaa inay shaaciso macluumaadka shakhsiyeed marka ay la xiriirto hawlgalinta ama isticmaalka gaariga ama badbaadada dadweynaha. Istickmaalka macluumaadka shakhsiyeed waxay la xiriirtaa badbaadada dadweynaha haddii ay khusayso badbaadada jireed ama badbaadada darawallada, baabuurta, dadka lugaynaya, ama hantida. Macluumaadka shakhsiyeed ee gaarka ah ee la siiyay codsada si uu u helo shatiga xaddidan ee shaqada beeraha waxaa lagu dabakhayaa Xeerka 18d Maraykanka, qaybta 2721, Xeerarka Minnesota, qaybta 171.12, iyo Xeerka Dhaqamada Xogta ee Dawlada Minnesota, Xeerarka Minnesota, Cutubka 13, waxaanay hoos imanaysaa shaacinta si waafaqsan shuruucdan.